



Folkhälsomyndigheten

VACCINATION MOT INFLUENZA OCH COVID-19, OKTOBER 2023, SOMALISKA

Talaalka ka hortagga hargabka xun iyo covid-19

Hey'adda caafimaadka bulshada waxay kula talinaysaa dhammaan dadka ah 65 jir ama ka weyn iyo dadka ku jira kooxaha khatarta ku jira inay is talaalaan.

Talaalku waa bilaash

Hey'adda caafimaadka bulshada waxay rabtaa inay idinku wargeliso sida soo socota:

- Dadka ku jira koox khatar ku jirta ayaa la siinayaa ahmiyadda dhanka talaalka hargabka xun iyo covid-19. Dadka ku jira koox khatar ku jirta talaalku waa u bilaash dalka oo dhan.
- Waa caadi in la iska talaalo harga xiliyeedka xun iyo covid-19 wakhti isku mid ah.
- Waxay u badantahay i hargabka xun iyo covid-19 ay labaduba faafaan xilliga jiilaalka. Talaalku waa qaabka ugu fiican ee lagu difaaci karo dadka khatar dheeraad ah ugu jira inay si halis ah u bukoodaan.
- Talaalku kuma difaacayo boqolkiiba boqol, laakiin wuxuu khafiifinayaa caabuqa haddii haddii qofku bukoodo inkastoo uu talaalan yahay.

Kooxaha khatarta ku jira ayaa ahmiyadda la siinayaa

Kooxahan soo socda waxaa lagula talinayaa inay iska talaalaan ka hortagga hargabka xun iyo covid-19 oo ahmiyad ayaa la siinayaa (iyadoo aan lahayn kala horeyn) inay is talaalaan:

- Dadka ah 65 jir ama ka weyn.
- Haweenka uurka leh ee ku jira toddobaadka 12-aad ka dib.
- Dadka waaweyn ee laga bilaabo 18 jir ee leh jirooyinka soo socda, xanuuno lagu sheegay ama xaalad jirta:
 - Cudur wadnaha iyo xididdada ah oo uu ku jiro dhiig maskaxda ku furmay. Dhanka covid-19 xitaa dhiig kar aad u kacsan.
 - Cudur xun oo sambabada ah, sida sambabo xanuun ama xiiq xun ama aan xasiloonaayn.
 - Xanuunada ama xaaladaha kale ee keena hoos u dhac awoodda sambabada ah ama awoodda qufacidda oo xumaata (tusaale ahaan buurnaan xad dhaaf ah, cudurada muruqyada neerfahooda ama hoos u dhac awoodda ah oo dhowr ah).

- Beerka ama keliyaha oo si xun hawshoodi u gabay.
- Cudurka sonkorta nooca 1 iyo 2.
- Xaalad keenta hoos u dhac awoodda difaaca jirka oo aad u hooseysa oo ay sabab u tahay cudur ama daweynta oo uu ku jiro Down syndrom.

Kooxaha kale ee si gaar ah loola danaynayo talaalka covid-19, marka laga reebo kooxahaas khatarta ku jira ee la sharraxay, waa dadka caawin dhinaca hawlaha nololaha ee maalinlaha uga baahan shaqaalaha adeegga guriga, iyo dadka leh caafimaad aad u xumaaday oo ay sababtay waxyaabo kale oo aan ahayn xaaladaha xanuun ee kor lagu sheegay.

Sababaha kale ee noocaas ah waxay ahaan karaan cudur maskax ahaan ah ama xanuunka ilowshaha, iyo xitaa isticmaal khamri oo waxyeelo leh ama isticmaalka daroogo.

Kooxahan soo socda waxaa lagula talinayaa inay iska talaalaan hargabka xun:

- Carruurta 6 bilood ilaa 17 jir ah ee leh cuduro, xaalado xanuun iyo xaalad waafaqsan liistada kor ku qoran ee dadka waaweyn.
- Dadka guriga ay xiriirka ku leeyihiin, carruur iyo dadka waaweyn labadaba, ee dadkaas leh hoos u dhac awoodda difaaca ah oo aad u hooseysa.
- Shaqaalaha dhanka daryeelka iyo xanaanada ee si dhow ugu shaqeeya bukaan socotada iyo dadka la siiyo daryeel ee khatar weyn ugu jira hargabka xun, tusaale ahaan hoy'yada gaarka ah ee waayeelka (SÄBO) iyo dhinaca shaqada adeegga guriga.

Dhakhtarka ku shuqul leh daryeelka ayaa samayn kara qiimeyn shakhsiga gaar u ah dhinaca baahida talaalka.